# Filimka cimiladda >

# La qabsiga Cimiladda Gudaha Norway

Cimiladdu waa ay isbeddelaysaa iyadda oo ay ugu wacantahay sii kululaanshaha adduunka. Qaybta Norway muhiim ahaan waxay la minco ahaan doontaa celceliska heer kuladda oo aad u sareeya, roob aad u badan oo da'a iyo jawiga hawadda o aad u xad dhaaf ah oo badan. Waxaa jira afar dhinac kaas oo gaar ahaan loo bandhigayo isbeddelada cimiladda: dhismayaasha iyo shaqada, biyaha iyo dhuumaha bulaacadaha, gaadiidka iyo beeraha. In si wanaagsan oo suuragal ah loogu diyaar garoobo mustaqbalka sidaas awgeed waa muhiim in lala qabsado isbeddelada cimilada, oo tani waxay noqon doontaa walax muhiim ah oo qorshaynta degmadda ah.

## Waajibaadyada la dhammaystirayo ka hor inta aanad arag filimka

1. Sidee ayaad u malaynaysaa in nidaamka deegaanka, beeraha, wadooyinka iyo dhismayaasha ku yaala Norway ay u saamayn kartaa isbeddelka cimiladdu?
2. Ma umalaynaysaa in bulshadda reer Noorway ahi ay qalabaysantahay si ay wax uga qabto di'itaanka roobka oo aad u badan, xaaladaha jawiga hawadda oo aad u xad dhaaf ah iyo sare u kaca heerarka badda? Xaqiiji jawaabtaada.

## Waajibaadka la xidhiidha filimka

1. Sidee ayay cimiladda Norway isku beddeli mustaqbalka?
2. Qaybahee Norway ah ayaa la kulmi doonaa kala duwanaanshaha ugu wayn ee di'itaanka roobka sanadaka 2100, oo gobolkee ayaa la kulmi doonaa kala duwanaanshaha ugu yar? Sababtee ayaad ugu malaynaysaa in tani ay noqon doonto xaalada?





KALA DUWANAANSHAHA DI'ITAANKA ROOBKA SANADKA 2100
KALA DUWANAANSHAHA WAYN KALA DUWANAANSHAHA YAR

3. Isbeddela cimiladdu waxa uu ku keenaa caqabado badan bulshadda. Diyaari caqabado guud mar ah iyo tusaalooyinka la qabsiga addoo buuxinaya jadwalka hoose. .

| **Aaga bulshadda** | **Caqabadaha ka yimid isbeddelada cimiladda** | **Tusaalooyinka la qabsiga** |
|---|---|---|
| Gaadiidka | | |
| Dhismaha iyo Shaqada | | |
| Biyaha iyo Dhuumaha Bulaacadaha | | |
| Beeraha | | |

4. Isticmaal filimka ama sawirka hoose si aad u sharaxdo waxa dhacay muddada daadka ee Kvam sanadkii 2013.



5. La qabsigee ayay degmaddu ka samaysay Kvam si ay u difaacdo waxyeelo cusub oo ka timaadda daadadka iyo dhul go'a?
6. Isticmaal jaantuuska agga daadka si aad u ogaato haddii uu jiro haliso daadadka ah meesha aad ku nooshahay. Qor dhowr layn oo ku saabsan xadka khatarta, iyo waxa dhici kara.
7. Sabatee ayay muhiim u tahay in degmooyinku ay diyaariyaan baadhitaanada halista iyo nuglaanta la xidhiidha isbeddelada cimiladda?
8. Waa maxay biyaha duufaanku, oo sababtee ayay biyaha duufaanku u yihiin dhibaato ka wayn degmooyinka sida aadka loo degenyahay iyo magaalooyinka/magaalooyinka waa wayn?
9. Midgardsormen waa casriyaynta Biyaha Oslo iyo Shaqada Dhuumaha Bulaacadaha. Sababtee ayaa cusboonaysiin loogu baahanyahay biyahii hore iyo nidaamka dhuumaha bulaacadaha?
10. Sababtee ayay muhiim utahay habaynta kuwa cusub oo la horumariyay oo kala duwanaanshaha beeraha ah?

## Waajibaadyo la sii xoojiyay

1. Ogow wax badan oo ku saabsan cawaaqibka isbeddelada cimilada iyo talaabooyinka la qabsiga jidhka ee degmaddaada.
   Booqo klimatilpasning.no si aad macluumaad u hesho oo qor maqaal gaaban ama macluumaadka buug yaraha ku saabsan tallaabooyinka la qabsiga gobolka (ka eeg qaabka talo bixinta www.naturfag.no/brosjyre).
2. Caqabadaha ku saabsan isbeddelada cimiladda inta badan waa ay dhici doonaan sababtoo ah waxaanu u dooranay si aan xikamad lahayn ama waxaanu amhiyada u kala siinay si khaldan dhanka

qorshaynta ama horumarinta bulshadda.

a) Bixi qaar ka mid ah tusaaloyinka qaarkood ee doorashooyinka liita ama amhiyad siinta khaldan.
b) Maxaad u malaynaysaa in ay noqon karaan sababaha doorashooyinka liita ama amhiyad siinta khaldan?

3. Diiwaangeli goobaha jawiga hawadda xad dhaafka ahi ay na saamaysay, iyo sida aad shakhsi ahaan tan loola kulmay, hawsha dhexdeeda Ekstremvær (Jawiga Xad dhaafka ah) bogga miljolare.no.